B

Housing

# BARNAAMIJKA IIBSADAHA GURIGA MARKII UGU HOREYSAY

**Mayor's Office of Housing**
**The Boston Home Center**

Waad ku mahadsan tahay xiisahaaga Xarunta Guriga ee Boston. Hoos waxaa ku qoran liiska dukumentiyada aad u baahan tahay inaad ku darto codsigaaga. Fadlan hubi inaad ku jirto dhammaan dukumentiyada loo baahan yahay ee liiska ku jira.

Marka codsigaagu uu ka buuxsamo dhammaan dukumeentiyada hoose, waxaad ku soo diri kartaa iimaylka bhc-oneplus@boston.gov ama boostada/in-qof ahaan loogu soo diro:

**The Boston Home Center**
**Attn: Homebuying Programs**
26 Court Street, Floor 8
**Boston, MA 02108**

Kaddib marka aan helno warqadahaan, waxaan ku ogeysiin doonaa, qoraal ahaan, xaaladda uu ku sugan yahay arjigaada.

## WARQADAHA LOOGA BAAHAN YAHAY DHAMAAN ARJIILEYAASHA:

- ☐ La dhamaystiray lana saxiixay Arjiga Brograamka Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Program Application). Dhammaan xubnaha qoyska waa in lagu qoraa arjiga. Haddii qof u muuqdo inuu ku nool yahay qoyska (tusaale ahaan, alaabaha shaqsiga leh ee guriga yaalo, boosto ku helida ciwaanka, ciwaanka ku qoran Aqoonsiga, iwm.), u guurista guri cusub, waa in loogu daraa sida xubin qoyska ah—xattaa haddii aysan ku qorneyn ammaahda. Dhammaan shaqsiyaadka ah 18 sanno jirka iyo ka weyn oo u liis gareysan sida xubnaha qoyska waa inay soo gudbiyaan warbixinta daqliga, bangiga, iyo hantida loo baahanyahay.
- ☐ Barnaamijka dhameystiran iyo saxiixanSiideynta.
- ☐ Koobiga Shahaadada Iibsadaha Guriga 101 (Homebuyer 101 Certificate) bixiyaha CHAPA soo ogolaaday https://www.chapa.org/
- ☐ Koobiga Heshiiska Iibsiga iyo Gadidda (Purchase and Sale Agreement), ama Qorshaha la Saxiixay lana Ogolaaday
- ☐ Koobiga Warqadda Horay loo Ogolaaday ama Horay loo Aqoonsaday) lagana soo qaatay Deymiyaha Ka Qeybgala Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center Participating Lender)

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

- [ ] Foomka W-9, oo saxiixan, lagana heli karo: https://www.irs.gov/pub/irs-pdf/fw9.pdf

- [ ] Ma jiro dhaarta Masruufka Ilmaha (https://bit.ly/nochildsupportsomali) ee xubin kasta oo qoyska ka tirsan oo kayar da'da 18 jir kaas oo codsadaha ama codsadaha aanu helin masruufka ilmaha

**Kuwa soo socda waxaa loogu talogalay dhamaan xubnaha reerka ee jira 18 sanno ama ka weyn kuna talojira in ay soo galaan hantida:**

- Koobiga Canshuur Celinta Federaalka (Federal Income Tax) 3dii sanno la soo dhaafay oo saxiixan lana soo raaciyay dhamaan jadwalada
- Koobiga 3dii sanno ugu dambeysay foomamka W-2
- Haddii aan la fayl gareyn Soo Celinta Canshuurta - Warqadda Xaqiijinta Federaalka ee Aan la fayl gareyn sanadka aan la fayl gareyn - Warqaddu waxay caddaynaysaa in IRS aysan haysan diiwaan ku saabsan Foomka 1040, 1040A, ama 1040EZ ee la fayl gareeyay sanadka. Tilmaamaha lagu helayo dukumeentigan waxaa laga heli karaa xiriirka soo socda: Warqadda Aan la fayl gareyn.
- Rasiidyada mushaarka ee 2 dii bilood ee la soo dhaafay. Tusinta mushaarka guud. Tan waxaa ka mid ah shaqada waqtiga barkii, shaqooyinka dhinaca, iyo shaqada heshiiska madaxa banaan sida Uber, PostMates, Instacart, Shipt, iwm. Haddii mushaarka hadda isma waafaqsana, fadlan bixi 6 bilood ee ugu dambeysay ee rasiidyada mushaarka.
    - Haddii iskaa u shaqeysatid, bixi Bayaanka Faa'idada iyo Qasaaraha sannadka-illaa-taariiqda ee ka timid adiga iyo xisaabiyahaaga, iyo koobiyada labada sanno ee la soo dhaafay ee Canshuur Celinta Federaalka, oo ay ku jiraan 1099. Tan waxaa ka mid ah shaqada waqtiga barkii, shaqooyinka dhinaca, shaqada heshiiska madaxa banaan sida Uber, PostMates, Instacart, Shipt, Iwm. Tan ayaa sidoo kale looga baahanyahay dhammaan xubnaha qoyska ee da'dooda 18 ama ka weyn oo aan aheyn arday waqti buuxo.
    - Haddii xubinta qof weyn ee qoyska oo aan hadda shaqeynin, sharaxaada daruufaha iyo a Maya Daqliga Afidheefidh waa in la gudbiyaa: (https://bit.ly/somalinoincome)
- Xubnaha qoyska oo 18 sanno jir ah ama ka weyn oo ah ardayda waqtiga buuxo waa inay bixiyaan qoraalka dugsiga AMA warqad ka timid machadkooda oo tilmaameyso diiwaangelintooda waqtiga buuxo.

***Badanaa, xubnaha qoyska waxay ka helaan daqli illaha aan ka aheyn mushaarka waqtiga buuxo- ama barkeed. Halkaan qaar ka mid ah qaababka daqliga guud ee lagu xisaabiyo dhinaca daqliga guud:***

- Amniga Bulshada- Warqada abaalmarinta sannadka hadda ee muujinayo cadadka bil-laha guud. Ma u baahantahay caawin, la soo xiriir xafiiska Amniga Bulshada deegaanka – lambarka guud waa (800) 772-1213.

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

- Mushaarka Halyeyga- sannadka hadda ama warqada abaalmarinta bil-laha ee Maamulka Halyeyga
- Mushaarka Hawlgalka iyo Shaqo fariistaha - warqada abaalmarinta sannadka hadda ama abaalmarinta bil-laha.
- Taageerada Canuga (xattaa haddii aadan heleynin lacag bixinada - Dalabka Maxkamada oo sheegayo cadadka la bixinayo; ma isticmaali karaan diiwaanka wareejinta. Haddii aysan jirin amar maxkamadeed, fadlan u codso Afidheefidhka Taageerada Canuga sida loogu baahanyahay.
- Mushaarka Shaqo la'aanta- warqada abaalmarinta muujineyso cadadka lagu helayo.

Dokumentiga hantida, waxaa looga baahanyahay dhammaan xubnaha qoyska 18 sanno jirka iyo ka weyn:

*Fadlan bixi bayaanka bangiga dhameystiran ee sadexdii bilood ee la soo dhaafay ee sheeyada xigga. Taariiqaha wareejinta lama aqbalayo.*

- **Dhammaan Akoonada Checking –** Waxaa ka mid ah akoono walba oo magacaaga ku qoran, magacyada caruurtaada, ama akoonada wadajirka (xattaa haddii aan la isticmaalin). Waa inaad ku dartaa dhammaan akoonada (xattaa kuwa carruurta leh ama dadka kale), oo ay ku jiraan akoonada wadajirka, xattaa haddii aadan iyaga isticmaalin.
- **Dhammaan Akoonada Savings –** Waxaa ka mid ah akoono walba oo magacaaga ku qoran, magacyada caruurtaada, ama akoonada wadajirka (xattaa haddii aan la isticmaalin). Waa inaad ku dartaa dhammaan akoonada (xattaa kuwa carruurta leh ama dadka kale), oo ay ku jiraan akoonada wadajirka, xattaa haddii aadan iyaga isticmaalin.
- **Dhammaan Heerarka Bangiyada Onleenka –Tusaalooyinka:** App-ka Kaashka, Mushaarka Venmo, Apple, iwm. akoonada. Haddii aad haysatid kuwa ka mid ah akoonadaan ku qoran magacaaga, Waa INAAD gudbisaa dokumentiyada, xattaa haddii aadan isticmaalin akoonka.
- **Akoonada hawlgabka qoyska** sida 401(k), 403B, IRA, Roth IRA, iyo shaqo ka fariisiga
- **Akoonada suuqa lacagta, badeecooyinka, bonds, dullaalada, Keogh, Treasury Bills, iwm.**
- **Bayaanada waa inay muujiyaan Boqoleyda Sannadlaha Yield (APY) oo dhammaan akoonada dulsaarka leh.**
- **Waa inay ku jiraan dhammaan akoonada ku qoran magacaaga iyo magacyada carruurtaada; tan waxaa ka mid ah akoonada wadajirka ee dadka kale, xattaa haddii aadan isticmaalin. (Bayaanka (bayaanada) waa inay**

**Fiiro gaar ah: Dabaajiyo walba oo $500 ama ka badan, oo ay ku jiraan dabaajiyada kaashka, iyadoon jirin dokumentiyo ku haboon, waxaa loo xisaabin karaa sida daqli. Fadlan sii sharaxaado dabaajiyo noocaas ah adoo isticmaalayo Foomkeena Dabaajiha Sharaxaada BHC.**

**Xasuusin:** Qor macluumaadka dheeraadka ah ay adiga kula tahay in aan ogaano si aan uga shaqeyno arjigaada.

___

___

___

# SHAACINTA IIBSADAHA GURIGA MARKII UGU HOREYSAY

## Mayor's Office of Housing
## The Boston Home Center

### SIFEYNTA

**Guri Iibsad-Waqti-koowaad:** Guri-iibsad-waqti-ugu-horreysay macnaheedu waa codsadaha, la-codsadaha ama xaaska aysan wax saamiga lahaanshaha guri ku lahayn deegaan maamule saddexdii sano ee la soo dhaafay marka laga reebo xaaladaha soo socda:

- **Waalid keligiis ah oo si sharci ah u furay.** Waalid keli ah oo leh xannaanada aasaasiga ah (oo ay ku jiraan xannaanaynta) carruurta aan qaan-gaarin ama uurka leh, oo hore u lahaan jiray gebi ahaan ama qayb ahaan hanti la deggan yahay laakiin aan hadda wax xuquuq ah ku lahayn hantida natiijada furiinka ama kala-tagga si sharci ah heshiis ama,
- **Dhaxalka.** Qoyska helay gebi ahaan ama qayb ahaan, hanti la dego ahaan dhaxal ahaan laakiin hadda aan lahayn xuquuq sharci ah taas ama hanti kale oo la deggan yahay.
- **Guriga Guurguura:** Reer lahaa gabi ahaan ama qayb ka mid ah guri guurguura laakiin kiraystay dhulkii ay hantidu ku taalay.
- **Noocyada Guryaha Iskaashatada qaarkood.** Iyadoo sida caadiga ah lahaanshaha qaybta guryeynta iskaashatooyinka loo tixgalin doono lahaanshaha guri, waxaa jira iskaashatooyin gaar ah oo ka dhow guryaha kirada ah marka loo eego lahaanshaha guriga. Kaliya iskaashatooyinka uu saamilaydu ka helo dhimista cashuurta ribada guryaha ee IRS ayaa loo qaadan doonaa inay yihiin lahaanshaha guri ujeeddooyinka siyaasaddan.

**Deganaanshaha Dhabta ah ee Maamulaha:** Hoyga uu iibsaduhu sida caadiga ah wax u cuno una seexdo oo uu ilaaliyo tiisa, iyada, ama saamayntooda shakhsi ahaaneed iyo tan qoyska; oo uu haysto, ama loogu talagalay in lagu qabsado, iibsaduhu sida gurigiisa ama gurigiisa oo aan loogu talagalin hanti maalgashi ama guri fasax ah ama loo isticmaalo ganacsiga ama ganacsiga. Iibsaduhu waa inuu ku noolaadaa guriga shan (5) todoba (7) maalmood ee usbuuca, oo haddii isaga/iyadu ay ku maqan yihiin fasax, ganacsi ama sabab kale, maalmaha maqan waxa laga yaabaa in aanay ka badnayn lixdan (60) ) maalmo isku xigta sannad kasta, marka laga reebo joogitaan isbitaal.

**Qoyska:** Xubinta Qoyska waxa lagu qeexi doonaa, wakhtiga codsiga:

- Dadka sida joogtada ah u wada nool, ee xidhiidhka la leh dhiiga, guurka, korsashada, ilaalinta, ama hawlgalka sharciga;

- Ama kuwa aan sidaas qaraabo ahayn, laakiin wadaaga dakhliga iyo kheyraadka oo ay ku talo jiraan in ay la wareegaan unugga si ay u noqoto degaankooda aasaasiga ah ee joogtada ah.

Lamaanayaasha si sharci ah isku guursaday waa in labadoodaba loo tixgaliyaa qayb ka mid ah qoyska. Si kastaba ha ahaatee, haddii shaqsiga "la kala maqan yahay," lamaanaha looma tixgelin doono qayb ka mid ah qoyska haddii codsaduhu uu si ku filan u diiwaangeliyo in lammaanuhu si gooni ah u nool yihiin.

Shakhsiyaadka wax wada iibsanaya, tusaale wax-iibsadayaasha, kuwaas oo hadda ku nool guryo gaar ah, codsiga waxa loo tixgelin doonaa xubnaha qoyska. Ama kuwa aan sidaas qaraabo ahayn, laakiin wadaaga dakhliga iyo kheyraadka oo ay ku talo jiraan in ay la wareegaan unugga si ay u noqoto degaankooda aasaasiga ah ee joogtada ah.

Xafiiska Guriyeynta Duqa Magaalada ayaa tixgelin doona duruufaha kale ee aan buuxin qeexitaankan haddii dukumeenti ku filan iyo/ama dhaarin nootaayo la keeno la bixiyo.

Xafiiska Guriyeynta Duqa Duqa ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu u baahdo dukumeenti dheeraad ah haddii loo baahdo si loo hubiyo u hoggaansanaanta ujeedada barnaamijka.

**Ku-dhaqanka Qeexidan:** Barnaamijyada lahaanshaha guri ee Xafiiska Duqa Magaalada, oo ay ku jiraan kaalmada maaliyadeed iyo cutubyada lahaanshaha guri ee xaddidan. Nidaamkani waxa uu khuseeyaa shahaadooyinka u-qalmitaanka ee la qabto wakhti kasta inta lagu jiro habka bakhtiyaanasiibka iyo iibsiga.

**Dakhliga Sannadka:** Wuxuu mattalaa lacagta uu qofka shaqeysto muddo hal sanno, kana soo gasha dhamaan ilaha, ka hor inta aan laga goynin canshuurta.

**Dakhliga Sannadka Reerka:** Iskudarka dakhliga soo gala dhamaan dadka ku talojirta in ay ku noolaadaan hooyga. Ilaha dakhliga waxaa ka mid ah, balse kuma eka:

- Xisaabta oo idil, ka hor inta aan waxba laga goynin lacagaha la xoogsadoiyo mushaarka, lacagaha waqtiga dheeraadka, korsaarka, khidmadaha, bakhshiishka iyo gunnada, iyo kharashka kale ee lagu bixiyo adeegyada qofka;
- Korsaarka, macaashka, iyo dakhliga kale ee soo xaasila oo nooc kasta, lagana helo hantida dhabta ah ama hantida qofka leeyahay;
- Xisaabta buuxda ee waqti ka waqti laga qaato Soshal Sekuriti, macaashka sannadka, ceymisyada, maaliyadda hawlgabnimada, xaqa, itaal darrida ama manaafacaadka dhimashada, iyo noocyada kale ee la midka ah kharashka lana qaato waqti ka waqti;
- Lacag bixinta baddalkii lacaga la shaqeysto, sida magta shaqo la'aanta iyo magta itaal darrida, magta shaqaalaha iyo xaqa la siiyo marka shaqaalaha laga joojiyo shaqada;

- Lacagaha kaalmada ceydha;
- Gunnada la qaato waqti ka waqti lana ogaan karo, sida taakuleynta xaaska, iyo lacagha masaruufka cungga, iyo ku biirinta lacagaha joogtada ama deeqda laga qaato ururo ama dad aan dagganeyn hooyga;
- Dhamaan lacagaha sida joogtada ah loo qaato, lacagaha khaaska iy gunnada uu qaato xubin ka tirsan Ciidaamada Qalabka Sida.

**Hantida:** Hantida waxaa ka mid ah dhamaan xisaabaadka bankiga ama xisaabaadka maaliyadda, ha ahaadaan lacagta caddaanka, lacagta ku soo siyaada hantida maguuraanka, maalgelinta, ama shay kasta oo qiimo leh. Shayga keliya oo ka reeban waa maaliyadda hawlgabnimada dawladda-ogolaatay iyo qorshooyinka keydka kulliyadda. Haddii loo baahdo in qorshaha hawlgabnimada ama qorshaha keydka kulliyadda la sarifo si loo taageero gadashada guriga, markaas oo keliya ayaa lagu dari karaa xisaabaadka hantida.

**Xaddidaadda Hantida:** Codsadaha waxaa loo arki karaa inuusan u qalmin haddii wadarta guud ee hantida guriga ay ka badan tahay $100,000. Intaa waxaa dheer, wax ka badan kala bar (50%) ee hantida iibsadaha haddii kale waxay ku jiri kartaa qaabka hadiyadda.

**Baahiyaha Hantida:** Codsadayaasha waxaa loo arki karaa inaysan u qalmin haddii, sida ku saleysan wadarta hantiyada qoyska, ma jiraan baahi la muujiyay.

## Qodobada iyo Sharuudaha

Xasuusin, isticmaalka keli ahaanta "Aniga" ama "waxayga" sida ku qoran hoos, waxaa soo gala jamaca marka ay jiraan in ka badan hal guri iibsade.

1. Mas'uuliyadda saaran qareenka u dooda bixiyaha deynta guriga waxay tahay in uu badbaadiyo maslaxadda bixiyaha deynta.
2. Qaataha deynta wuxuu qabsan karaa qareen u gaar ah, wuxuu qoran karaa qareen mattalaa maslaxadiisa ganacsiga, hase ahatee waa in bixiyo kharashka.

Aniga, ________________________________________________________________, waxaan halkaan dalbaday Kaalmada Maaliyadda sida hoos timaado lacagta hormarinta (down payment) iyo brograamka kaalmada kharashka ku baxa soo afjaridda ee laga qaato Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center). Aniga waxaan halkaan ku caddeynaa iyo waxaan ballan qaaday sida soo socoto.

- Macluumaadka Dakhliga Reerka (Household Income Information) waxaa soo gala dhamaan dadka ku talojira in ay daggan guriga, aan Aniga daggi doono. Aniga waxaan ku soo darray da'dooda, xariirka ay ila leeyahiin, isha (ilaha) ay ka helaan dakhliga, iyo dakhliga guud sannadka iminka lagu jiro ee ka soo gala dhamaan ilaha (dakhliga la canshuuro iyo dakhliga aan la canshuurin), kana mid ah balse ku ekeen: **dakhliga la**

**shaqeysto, waqtiga dheeraadka, qeybsiga IRA, shaqada la shaqeeyo qeyb ka mid ah waqtiga, gunnada, macaashka, korsaarka, fa'iidada sannadka, hawlgabnimada, Magta Maamulka Ciidamada (Veterans Administration VA Compensation), dakhliga kireynta guud ama dakhliga kirada muddada dheer iyo muddada gaaban, khidmadaha, dakhliga gadaal loo dhigay, kharashka ceydha, manaafacaadka soshal sekuriti, lacagaha itaal darrida, taakuleynta xaaska, lacagaha masaruufka ilmaha, kaalmada dadweynaha, mushaarka fasaxa jirrada, magta shaqo la'aanta, iyo dakhliga laga helo ammaanada, hawlaha ganacsiga, iyo maal gelinta.**

- Aniga waxaan fahamsanahay in ay waajib igu tahay in aan isticmaalo Deymiyaha Ka-Qeybgala Magaalada Boston (City of Boston Participating Lender) iyo deynta la soo ogolaaday ee u hoggaansan xuduudda waafaqsan deynta Fannie Mae.
- Waxaan fahamsanahay in, ka hor intaanan helin Kaalmada Dhaqaale, waxaa la iiga baahan doonaa inaan saxiixo Shuruudaha iyo Shuruudaha.
- Waxaan ku degi doonaa guriga aan iibsanayo oo ah deganaanshahayga koowaad lixdan (60) maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda xidhitaanka ilaa si kale loogu heshiiyo Xafiiska Guriyeynta Duqa Magaalada Boston oo aan si joogto ah u deganaan doono guriga intaa ka dib.
- Aniga waxaan kaloo aaminsanahay, Aniga oo daacad ka ah, in aan u guuro guri banaan iyo in daggideyda ma barakicin doonto dagganeyaasha ama milkiilahii hore. Aniga waxaan fahamsanahay in ugu yaraan hal guri banaan yahay marka aan soo guuro.
- Aniga kor uma qaadi dooni kirada dagganeyaasha si aan ugu qasbo in ay ka baxaan hantida sannadka kowaad gudaheeda marka aan la wareego milkiyadda.
- Aniga waxaan hantidaan ugu noolaan doonaa sida gurigeyga aasaasiga inta ay socoto deyntaan.
- Angia ma yeelanin hanti saddaxdii (3) sanno ee la soo dhaafay.
- Aniga waxaan aqoonsanahay in baddalaadda kondominiumka aan la ogoleyn inta lagu dhex jiro muddada deynta.
- Aniga waxaan la socdaa in haddii aan xaq u yeesho marka HUD fiiriso dakhliga, kaddibna aan iibsado hanti la dhisay sannadka 1978 ka hor, in loo baahan yahay in Fattashaadda Rinjiga La Arki Karo (Visual Paint Inspection) lagu sameeyo hantida ka hor inta aan la soo afjarin iibsashada (closing).
- Aniga waxaan ogsoonahay in muddo lex (6) bil gudahooda laga bilaabo heshiiska iibsashada (closing), waa in aan qaato fasalka "Iibsadaha Guriga 201" ("Homeowner 201") ee laga qaato MAHA.

**Caddeynta**

- Aniga weligey leyguma helin dambiga dab shididda ama kadeedka loo geysto dagganaha ama leyguma helin in aan jebiyay sharciyada u daggsan Caddaaladda Guriyeynta (Fair Housing).
- Aniga iminka ma ihi eeydeysane ku lug leh kiis la xariira dab shidid, mana ihi eedeysane ku lug leh arrin la xariirta Caddaaladda Guriga.
- Aniga hadda ma ihi eedeysane ku lug leh dhedhexaadinta lala galo Guddiga Caddaaladda Guriyeynta Boston (Boston Fair Housing Commission) ama Guddiga ka soo Horjeedo Takoorka Massachussets (Massachusetts Commission Against Discrimination).
- Aniga leyguma laha waajibka canshuurta hantida iga saaran Magaalada Boston.
- Waxaan cadeynayaa in aniga, ama xubin kasta oo qoyska ka tirsan, aan hadda ahayn ama aan ku sugnaa laba iyo tobankii (12) bilood ee la soo dhaafay, shaqaale, wakiil, lataliye, sarkaal, ama la doortay ama la magacaabay sarkaal ka tirsan Duqa Magaalada Boston. Xafiiska Guriyeynta. Siidayntan awgeed, "xubin qoyska ka tirsan" waa in ay ku jiraan waalidiinta, xaaska, walaalaha, ama carruurta, iyada oo aan loo eegin meesha ay deggan yihiin.
- Waxaan la socdaa in macluumaadka halkan ku jira ay ku xiran yihiin xaqiijinta Xafiiska Guriyeynta Duqa Magaalada ama wakiiladiisa.
- Waxaan halkan ku fasaxay hay'ada amaahinta inay u sii deyso agabka sirta ah ee la xidhiidha deymaha amaahda guryaha ee Duqa Magaalada ama wakiiladeeda, ujeedaduna tahay xaqiijinta macluumaadka ku jira codsigan. Codsigan waa la soo saari karaa, koobiguna wuxuu noqon doonaa mid waxtar leh sida oggolaanshaha asalka ah.
- Aniga waxaan ku dhawaaqaa sida hoos timaado been abuurka in macluumaadka la soo dhaafay yahiin run, sax, dhamaystiran ilaa inta ugu badan aan aaminsanahay. Aniga waxaan halkaan u fasaxay Magaalada Boston in ay si madax banaan ku xaqiijiso macluumaadka la bixiyay halkaan iyo sidoo kale in la baaro diiwaankeyga deynta. Aniga waxaan caddeynaa in aan akhristay Sharuudaha iyo Xaaladaha Kashifaadda Brograamka (Program Disclosure) iyo waxaan waafaqsanahay Qodobada iyo Sharuudaha.

---

Arjiilaha (daabac magaca)

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

Saxiixa Arjiilaha

Taariikhda

Arjiilaha Labaad (daabac magaca)

Saxiixa Arjiilaha Labaad

Taariikhda

# BROGRAAMKA IIBSADAHA GURIGA MARKA-KOWAAD

## Mayor's Office of Housing
## The Boston Home Center

**1. Macluumaadka Arjiilaha**

Arjiilaha: ____________________
Magaca Kowaad　Magaca Dhexe　Magaca Saddexaad

Iimayl: ____________________

Taariikhda Dhallashada: __________ Nambarka Soshal Sekuritiga: __________

Cinwaanka: ____________________
Jidka　Magaalada　Gobolka　Baaq-sirka Zip

Lambarka Taleefanka Koowaad: __________

Lambarka Taleefanka Labaad: __________

Ma tahay muwaadin Maraykan ah?
- ☐ Haa
- ☐ Maya

Ma waxaad tahay Resident Alien?
- ☐ Haa
- ☐ Maya

Arjiilaha Labaad: ____________________
Magaca Kowaad　Magaca Dhexe　Magaca Saddexaad

Iimayl: ____________________

Taariikhda Dhallashada: __________ Nambarka Soshal Sekuritiga: __________

Cinwaanka: ____________________
Jidka　Magaalada　Gobolka　Baaq-sirka Zip

Lambarka Taleefanka Koowaad: __________

Lambarka Taleefanka Labaad: __________

Ma tahay muwaadin Maraykan ah?
- ☐ Haa
- ☐ Maya

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

Ma waxaad tahay Resident Alien?

☐ Haa

☐ Maya

**2. Hantida Loo Rabo Deynta**

Fadlan ka jawaab su'aalaha hoose ee ku saabsan guriga la iibsanayo. (Haddii aad hore u lahayd soo jeedin la aqbalay ama Heshiiska Iibka & Iibka.)

Cinwaanka: ______________________________

Jidka

______________________________ Boston, MA ______________________________

Xaafadda

Baaq-sirka Zip

Nooca Hanti (fadlan calaamadee hal kaliya):

- ☐ Hal qoys
- ☐ Labo qoys
- ☐ Saddax Qoys
- ☐ Kondominium

Taariikhda Dhismaha Hantida: ______________________________

Taariikhda Xidhitaanka La Soo Jeediyay (laga bilaabo Heshiiska Iibka & Iibka ama Saxiixa & Soo Bandhigida La Aqbalay):

______________________________

Sicirka Iibsiga: ______________________________

Deymiyaha Deynta Hantida: ______________________________

**3. Macluumaadka Dakhliga Reerka**

Fadlan u buuxi qof kasta oo la nool codsadaha guriga cusub.

| Magaca Xubinta Reerka | Taariikhda Dhallashada | Xariirka uu la Leeyahay Arjiilaha | Iskudarka Dakhliga Sannadka** |
|---|---|---|---|
| | | Codsadaha | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

**Ilaha laga helo daqliga waxaa ka mid ah mushaarka, waqtiga dheeraadka, gunnada, khidmadda, soshal sekuriti/manaafacaadka hawlgabnimada, manaafacaadka shaqo la'aanta, dakhliga korsaarka/wadaagga, ceydha, taakuleynta xaaska/masaruufka cunugga iyo dhamaan dakhliga kale.

**Tirada dadka rabta inay ku noolaadaan guriga:** ________

**Wadarta Dakhliga Qoyska:** ________

**Ilaha Dakhliga**

| Magaca Xubinta Reerka | Isha Dakhliga (Shaqo, Shaqaale iskaa u shaqeyste, faa'iidooyinka/ hawlgabka, masruufka ilmaha) | Soo noqnoqda | Tirada guud |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |

4. Macluumaadka Hantida Qoyska

Lacag caddaan ah, xisaabaadka bangiga, xisaabaadka maalgashiga, Cryptocurrency, iwm.

| Magaca qofka Akoonka Haya | Hay'ad | Lambarka Akoonka | Hadhaaga Akoonka |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

Wadarta: ________

Xisaabaadka hawlgabka, oo ay ku jiraan 401 (k), Roth IRAs

| Magaca qofka Akoonka Haya | Hay'ad | Lambarka Akoonka | Hadhaaga Akoonka |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |

**Wadarta:** ________

**5. Macluumaadka Xariirka Suuq Geynta**

Fadlana buuxi qeybta soo socoto si aad noogu kaalmeysid in aan fullino sharuudahena xariirka suuq geynta. Jawaabtaada waa iskaa mana saamayn doonto arjigaada.

Jinsiyada qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan (calaamad dhammaan kuwa khuseeya):

- ☐ Cadaan
- ☐ Aasiyaa
- ☐ Madoow ama Afrikaan Maraykan ah
- ☐ Hindi Mareykan ah ama Alaska Dhalad ah
- ☐ Hawaiian Dhalad ah ama Pacific Isalnder kale
- ☐ Wax kale: ______________________________

Codsaduhu ma u aqoonsadaa Hisbaanik ama Latino?

- ☐ Haa
- ☐ Maya

Arjiilaha ma yahay qof itaal darran?

- ☐ Haa
- ☐ Maya

Arjiilaha ma ka weyn yahay 62 sanno?

- ☐ Haa
- ☐ Maya

Arjiilaha ma tahay haween madax ka ah reerka?

- ☐ Haa
- ☐ Maya

Sidee ku maqashay barnaamijkan (calaamadee dhammaan kuwa khuseeya)?

- ☐ Xayeysiiska Wargeysyada

- ☐ Websaydhka Xarunta Guriga Boston
- ☐ Kaarka Boostada ee Guriga
- ☐ Xayeysiiska Shabakadda
- ☐ Guri iibiye 101 Darajo
- ☐ Saxiib
- ☐ Heerka Kaalmada Dhaqaale
- ☐ Wax kale: ______________________________

**6. Saxiix kuna qor Taariikhda**

Aniga waxaan caddeynaa sida hoos timaado been abuurka in macluumaadka la soo dhaafay yahiin run, sax, dhamaystiran aan qalad lahayn dhinac kasta. Aniga waxaan halkaan u fasaxay Magaalada Boston in ay si madax banaan u xaqiijiso macluumaadka la bixiyay halkaan. Aniga waxaan caddeynaa in aan akhristay Kashifaadda Brograamka iyo waxaan waafaqsanaha Qodobada iyo Sharuudaha brograamkaan. Aniga, waxaan fahamsanahay sida hoos timaado Sharciga Sheegashada Beenta (False Claims Act), 31U.S.C§§ 3279-3733, kuwa iyagoo ogsoon soo gudbiya, ama sabab u noqda in qof kale ama hay'ad, soo gudbiso sheegashooyin been ah oo lagu qaato maaliyadda dawladda, waxaa loo qabsan karaa saddax laab khasaarada soo gaartay dawladda lagu darray ciqaabta madaniga halkii sheegasho oo been abuur lagu qaato.

______________________________________________
Arjiilaha (daabac magaca)

______________________________________________
Saxiixa Arjiilaha

______________________________
Taariikhda

______________________________________________
Arjiilaha Labaad (daabac magaca)

______________________________________________
Saxiixa Arjiilaha Labaad

______________________________
Taariikhda

EQUAL HOUSING OPPORTUNITY